# Foomka saxiixa ka qayb qaataya

**Magaca(yada) ka qayb qaataha**

........................................................................................................

........................................................................................................

........................................................................................................

**Lambarka(ada) Aqoonsiga WIC**

........................................................

........................................................

........................................................

## Xuquuqdayda iyo waajibaadkayga

Waxaan fahamsanahay xuquuqdayda iyo waajibaadkayga sida uu dhigayo sharciga barnaamijka WIC. Dhammaan macluumaadka aan siiyay WIC waa kuwo sax ah, iyadoo shaqaalaha WIC ay fiirin karaan mid kasta oo ka mid ah macluumaadkan. Waan raaci doonaa xeerarka u yaala WIC ee ku qoran halka dambe ee foomka **Xuquuqda iyo Waajibaadka**. Haddii aan raaci waayo xeerarka u yaala, waxaa suuragal ah in ay la soo gudboonaato dacwo dhanka sharciga ah ama la iga joojiyo oo ay noqoto in aan lacagta dib uga soo celiyo WIC kaasi oo ah cuntooyinka ama caanaha carruurta 'formula' ee ahayd in aanan qaadan. Waxaa la isiin doonaa kaarka eWIC waxaanan mas'uul ka ahay xaqiijinta badbaadada kaarkayga iyo PIN lambarkayga.

## Macluumaadkayga waxa ay ahaanayaan kuwo la dhowray

- Macluumaadka aan bixiyay waxay noqon doonaa kuwo dhowray.
- Macluumaadka ku saabsan ka qayb qaadashadayda WIC waxaa suuragal ah in lala wadaago barnaamijyada caafimaadka dadweynaha gobolka Oregon ee kale iyo barnaamijyada Waxbarashada Hore ee Dhallaanka ee Oregon (Oregon Head Start). Macluumaadkan waxaa kaliya loo isticmaali doonaa si uu iiga caawiyo helidda adeegyada caafimaad iyo ogaanshaha sida wanaagsan ee adeegyadani u buuxinayaan baahidayda.
- Diiwaanada tallaalka ee ilmahayga waxaa suuragal ah in lala wadaago diiwaanka tallaalka gobolka ee guud.

## Ogolaanshaha adeegyada

Waxaan Barnaamijka WIC ee Oregon u ogolaanayaa in ay i siiyaan baaritaan caafimaad iyo/ama siiyaan ilmaha ama carruurta kor ku qoran inta uu socdo adeega barnaamijka WIC ama u qalmidu. Ogolaanshahani waa in uu ahaadaa mid dhaqan-gal ah ilaa laga joojiyo maahane iyadoo uu sidoo kalena khuseeyo mid ama labba ka mid ah kuwo soo socda:

- Taariikhda caafimaad iyo cuntada
- Dhererka iyo miisaanka
- Baaritaanka dhiig yarida
- Talo bixinta nafaqada/waxbarasho

## Bixinta macluumaad

Haddii aan u guuro meel kale oo ah degaan ay WIC adeega ka bixiso, macluumaadka u qalmida ee aan bixiyay waxaa lala wadaagi doonaa xarunta WIC ee ku taala degaankayga cusub si aan u sii wato helidda gargaarada WIC. Waxaa suuragal ah in WIC macmuulaadka ku saabsan aniga ama ilmahayga la siiso aniga (ka qayb qaataha/daryeelaha).

**Saxiixada aan saxiixayo foomkan, waxaan oggolahay macluumaadka kor ku qoran. Dhammaan ka qayb qaatayaashu waa in ay saxiixaan qaybtan foomka si ay helaan gargaarada WIC.**

..........................................................................................................................................

Saxiixa ka qayb qaataha/daryeelaha/qofka kaarka leh — Taariikhda

## Isku diiwaan gelinta cod bixinta

Haddii aadan isku diiwaan gelin in aad codayso halka aad hada ku nooshahay, ma rabtaa in aad maanta isku diiwaan geliso codaynta?

☐ **Haa.** (Halka aad u gudbiso is diiwaan gelintaadu waa mid sir ah.)

☐ **Maya.** (Marka aad calaamadayso "maya" waa mid sir ah.)

Haddii aadan calaamadayn sanduuq, waxaan u qaadanaynaa in aadan rabin in aad isku diiwaan geliso.

.......................................................................................................................................

Saxiixa ka qayb qaataha/daryeelaha Taariikhda

## Macluumaad kale ee ku saabsan isku diiwaan gelinta:

- Xafiiskaaga doorashooyinka degaanka ayaa boosta kuugu soo diri doona kaar si ay kuula socodsiiyaan in ay heleen is diiwaan gelintaadii.
- Waxaad codsan kartaa taageero si aad u buuxiso foomkan ama adigaa iskaa u buuxsan kara.
- Adeega ama gargaarada laga yaabo in aad ka hesho waaxdani ma saameyn doono go'aankaaga aad isku diiwaan gelinayso ama aadan isku diiwaan gelinaynin ama doorashada xisbiga aad rabto.
- Haddii aad u malaynayso in qof soo farageliyay xaqa aad u leedahay is diiwaan gelinta ama diidmadaada is diiwaan gelinta, ama xaqa aad u leedahay in la dhowro waxyaalaha kuu gaarka ah ee la xiriira go'aanka is diiwaan gelinta, ama xaqa aad u leedahay doorashadaada siyaasadeed, waxaad cabasho u gudbin kartaa Xoghayaha Gobolka (Secretary of State), Salem, Oregon 97310. Telefoonka 503-986-1518.

Waaxdani waa fursad shaqo bixiye loo wada siman yahay. Sida ku cad xeerka Federaalka ee sharciga xuquuqda dadweynaha iyo xeerarka u yaala xuquuqda dadweynaha ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA, waaxyaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaheeda, iyo hay'adaheeda kala duwan ee ka qayb qaadanaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxay ka mamnuucaysaa kala takoorida la xiriirta jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, lab ama dhidig, naafanimada, da'da ama aargoosiga, ama aargoosiga ku saabsan xiriir hore oo lala lahaa dhaqdhaqaaq u dooda xuquuqda dadweynaha oo ka tirsan barnaamij ama hawl ay samaysay ama maal-gelisay USDA. Dadka naafada ah ee u baahan noocyo kale oo isgaarsiin oo loogu tala galay macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, farta waaweyn, cajalada la duubo, Nooca Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ee Maraykanka, iwm.), waa in ay la xiriiraan Hay'ada (Gobolka ama degaanka) halka ay ka dalbadeen gargaarada. Shakhsiyaadka aan dhagaha wax ka maqlin, aanan si fiican wax u maqli karin, ama dhibaato hadal qaba waxay la xiriiri karaan USDA iyagoo isticmaalaya Adeega Gudbinta ee Dawladda Dhexe 'Federal Relay Service' (800) 877-8339. Intaasi waxaa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa suuragal ah in ay jiraan iyagoo ku qoran luqaddo aan ka ahayn Ingiriisiga. Si aad cabasho kala takoorida ah u gudbiso, buuxi Foomka Barnaamijka Cabashada Kala takoorida ee USDA (AD-3027) (USDA Program Discrimination Complaint Form), ee laga helo bogga internet-ka: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, ama xafiis kasta oo ay leedahay USDA, ama qor warqad lagu hagaajo USDA waxaanad warqada ku bixisaa dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Si aad u codsato foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Foomka aad buuxisay ama warqada u gudbi USDA adigoo isticmaalaya:

***(1) Boosta:*** U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;

***(2) fax-ka:*** (202) 690-7442; ama
***(3) email-ka:*** program.intake@usda.gov

**Haddii aad doonaysid macluumaadkan oo ah farta waaweyn, ama nooc kale ah, fadlan wac 971-673-0040 ama TTY 1-800-735-2900.**